Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta

## Macluumaadka Ku Saabsan Magacaabista Ka-faa'iideystaha

a. Markaan xareeyo Foomkan Magacaabista Ka-faa'iideystaha, waxaan burinayaa dhammaan magacaabisyadi hore ee ka-faa'iidaysteyaasha koowaad iyo labaad ee hoos yimaada Qorshayaasha.

b. Magacaabista ka-faa'iideystaha ee lagu sameeyo Foomka Magacaabista Ka-faa'iideystaha waa mid aan ansax ahayn ilaa ay ku jiraan magaca, ciwaanka, iyo lambarka Sooshal Sakuuratiga ee ka-faa'iideystaha, uuna qeexo xiriirka aniga igala dhexeeya ka-faa'iideystaha.

c. Haddii xiriirka aniga igala dhexeeya ka-faa'iideystaha aanu sii jirin wakhtiga dhimashadayda, magacaabistaasi waxa ay noqonaysaa mid aan ansax ahayn. (Tusaale ahaan, marka la is-furo, magacaabista ka-faa'iideyste "lammaane" waxay noqotaa mid aan ansax ahayn. Qofkaas hadda kadib ma sii noqon karo ka-faa'iideyste ilaa ka qaybqaataha uu soo gudbiyo Foomka Magacaabista Ka-faa'iideystaha oo cusub oo u magacaabaya qofkaas in uu noqdo ka-faa'iideyste kuna calaamadinayo in xiriirka kala dhexeeya uu yahay "lammaane hore".)

d. Haddii aan canug yar u magacaabo ka-faa'iideyste, qofka gacanta ku haya ama mas'uulka ka ah canugga yar waxaa laga yaabaa inuu helo xuquuq uu ku maamulo dheefaha canugga yar.

e. Haddii uusan jirin ka-faa'iideyste koowaad oo ii nool, xuquuqda dheefaha waxay u gudbaysaa ka-faa'iideystayaasha labaad. Haddii uusan jirin ka-faa'iideyste koowaad ama labaad oo ii nool,, dheefaha waxaa loo qaybin doonaa sida lagu sheegay mid kasta oo ka mid ah Qorshayaasha.

f. Xuquuqaha ka-faa'iideysteyaal kasta oo lagu qoondeeyo Foomka Magacaabista Ka-faa'iideystaha waxay ku xiran yihiin qodobada iyo shuruudaha sida lagu sheegay mid kasta oo ka mid ah Qorshayaasha.

g. Bixinta manfacyadayda ee la siinayo ka-faa'iideystaha ama ka-faa'iideystayaasha lagu qoondeeyay Foomka Magacaabista Ka-faa'iideystaha waxay noqon doontaa siin dhamaystiran oo buuxda iyo ka fasixidda wakiilada Ammaanada, Maamulaha Qorshaha, iyo Shaqo Bixiyaha illaa xadka lacag-bixintaas.

h. Waqti kasta ka hor intaanan dhiman, waan burin karaa, wax ka beddeli karaa, ama beddeli karaa magacaabista ka-faa'iideystaha, balse kaliya anigoo markale Foomka Magacaabista Ka-faa'iideystaha ka xaraynaya Maamulaha Qorshaha.

## Tilmaamaha Kaarka Xogta Aasaasiga Ah/Magacaabista Ka-faa'iideystaha

Kaarkani waxaa loogu talagalay in lagu aqoonsado magacaabista ka-faa'iideystaha ee kababka caymiska nolosha ee lagu heli karo Sanduuqa Caafimaadka iyo dheefaha dhimashada ee uu bixiyo Qorshaha Hawlgabka (haddii ay khuseyso).

Fadlan Xafiiska Sanduuqa sii dhammaan macluumaadka la codsado oo u sheeg wixii isbeddel ah adiga oo gudbinaya kaar la cusboonaysiiyay. Fadlan boosto ugu dir:

Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500
Bloomington, MN 55425

Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta
3001 Metro Drive, Suite 500, Bloomington, MN 55425 | (952) 854-0795

# FOOMKA MAGACAABISTA KA-FAA'IIDEYSTAHA

Xogta Ka-qaybqaataha:

Magaca Koowaad    Dhexe    Dambe    Lambarka Sooshal Sakuuratiga    Taariikhda Dhalashada

Ciwaanka Waddada    Magaalada    Gobolka    Koodhka Boostada

Fadlan buuxi macluumaadka hoos lagu codsaday si aad u magacawdo ka-faa'iideystahaaga. Haddii aad rabto in aad qorshe kasta u magacowdo ka-faa'iideyste gaar ah, fadlan la xiriir Maamulaha Qorshaha. Magacaabista ka-faa'iideystaha waxaa la beddeli karaa iyadoo la xareynayo magacaabis cusub. Ma jirto wax magacaabis ah oo dhaqangalaysa ilaa laga xareeyo Maamulaha Qorshaha.

**Waxaan akhriyay "Macluumaadka Ku Saabsan Magacaabista Ka-faa'iideystaha" ee ku jira foomkan.**

Saxiixa Ka Qaybqaataha    Taariikhda

Haddii aad guursatay oo aadan ka-faa'iideyste koowaad U DOORAN lammaanahaaga, saygaaga/xaaskaaga waa inuu saxiixaa/saxiixdaa foomkan ka tanaasulaya xuquuqdiisa/xuquuqdeeda hawlgabka iyadoo ay joogto nootaayo.

Anigoo ah, qofka hoos ku saxiixan, oo ah lammaanaha ka qaybqaataha Qorshaha ee magacaaban, waxaan oggolahay ka-faa'iideyste kale oo koowaad oo aan lammaane ahayn la magacaabo iyo qaybinta dheefo kasta lagu sameeyo si waafaqsan shuruudaha Qorshaha Hawlgabka (haddii ay khusayso). Waxaan fahamsanahay in dheefo kasta oo Qorshaha ah oo la bixin karo marka uu dhinto ka qaybqaataha magacaaban la siin doono ka-faa'iideystaha(ka-faa'iideystayaasha) ku magacaaban Foomka Magacaabista Ka-faa'iideystaha qadar dhan boqolleyda lagu qoondeeyay foomkan anigana aan la i siin, waxaana halkan ku oggolaaday magacaabista iyo wax siinta qofkaas aan lammaamaha ahayn.

Saxiixa Lamaanaha    Taariikhda

Saxiixa Nootaayada Dadweynaha    Taariikhda idanka Guddigu Dhacayso

**Ka-faa'iideystaha(Ka-faa'iideytayaasha) Koowaad:**

Magaca    Xiriirka idin ka dhexeeya    Lambarka Sooshal Sakuuratiga    Taariikhda Dhalashada

Ciwaanka Waddada    Magaalada    Gobolka Koodhka Boostada    Boqolkiiba

Magaca    Xiriirka idin ka dhexeeya    Lambarka Sooshal Sakuuratiga    Taariikhda Dhalashada

Ciwaanka Waddada    Magaalada    Gobolka Koodhka Boostada    Boqolkiiba

**Ka-faa'iideystaha(Ka-faa'iideytayaasha) Labaad:**

Magaca Dhalashada    Xiriirka idin ka dhexeeya    Lambarka Sooshal Sakuuratiga    Taariikhda

Ciwaanka Waddada    Magaalada    Gobolka    Koodhka Boostada    Boqolkiiba

Magaca Dhalashada    Xiriirka idin ka dhexeeya    Lambarka Sooshal Sakuuratiga    Taariikhda

Ciwaanka Waddada    Magaalada    Gobolka    Koodhka Boostada    Boqolkiiba